



**Buugyarah Macluumaadka  
Waalidka ee NYSITELL**

**Ku soo dhawow nidaamka dugsiga dadweynaha ee Gobolka New York! Hawlgalka Xafiiska Luuqadaha Adduunka iyo Waxbarashada Labada Luuqadood (OBEWL) ee Waaxda Waxbarashada Gobolka New York (NYSED) waa hubsashada in dhammaan ardayda Gobolka New York(NYS) oo ay ka mid yihiin Bartaha Luuqadda Ingiriiska/Bartaha Luuqadaha Badan (MLLs), ay gaaraan heerka ugu sareeya ee guusha tacliineed iyo si fiican u aqoonidda luuqad. Waxaan ku dadaalnaa hubsashada in dhammaan wadooyinka waxbarashada ardayda gaarka ah iyo baahiyada bulshada iyo shucuurta looga soo baxo luuqado badan oo u horseedaya kuleej iyo u-diyaarsanaanta shaqo.**

#### **HORUDHAC**

Xilliga dlintaiiwaan gelinta waxaad tilmaantay in luuqadda aasaasiga ama guriga ee ilmahaaga ay tahay luuqad aan ahayn Ingiriis, waxaana waraysi la yeeshay bare asaga ama iyada si loo go'aamiyo baahida suurtagalka ah ee taageerada dheeraad ah ee luuqadda Ingiriis. Macluumaadka la ururiyay xilliga waraysiga waxay muujiyeen in ilmahaaga u qalmi karo adeegyada ELL iyo in loo aqoonsado sida suurtagalka ah ELL/MLL. Si loo xaqijiyo in ilmahaaga uu u-qalmo taageero luuqadda Ingiriiska oo dheeraad ah, ilmahaaga hadda waxaa la siinaya Imtixaanka Aqoonsiga gobolka New York ee loogu talogalay Bartaha Luuqadda Ingiriiska (NYSITELL).

#### **WAA MAXAY UJEEDDADA NYSITELL?**

Ujeeddada NYSITELL waa in la qiimeeyo heerka luuqadda Ingiriiska ee ardayda cusub ee luuqaddoda aasaasiga ama guriga ah luuqad aan ahayn Ingiriis. Darajada ilmahaaga ee NYSITELL (Gelitaan, Soo-kicidda, Isbeddelya, Balbalaaranaya, ama horreeya) waxay go'aaminaysaa asaga ama iyada ay xaq u leeyihiin in ay helaan adeegyada ELL oona go'aamin doona heerka taageero luuqada ingiriiska. Natijjooyinka waxaa kaloo ka caawiyaan macalimiinta qorsheenta barnaamijka ugu fiican ilmahaaga oo ku saleysan awoodihiisa ama awoodaheeda iyo baahiyada dhageysiga, akhrinta, hadalka iyo qoraalka Ingiriiska.

#### **GOORMEE AYAA LA SIIYAA NYSITELL?a**

NYSITELL waxaa loo maamulaa sida suurtagalka ah ELLs/MLLs kaliya hal mar kadib ku diiwaangelinta nidaamka dugsiga Gobolka New York.

#### **WAA MAXAY NOOCYADA SU'AALAHAA EE ARDAYDA LA WAYDDIINAYO?**

NYSITELL waxaa ka mid ah kala-doorasho, jawaabcelin qoran oo gaaban, jawaabcelin qoran oo dheer, iyo su'aalo looga jawaabo afka oo ah dhageysi, hadal, akhrin, iyo qoraal.

#### **SIDEEN U HELAYAA NATIIJOOYINKA?**

Dugsiga ee uu ilmahaaga dhigto wuxuu boostada kuugu soo diraya warqadda wargelinta waalidka ee tilmaamaysa heerka iyo tallaabootin kasta dheeraad ah ee aad u baahan tahay in aad qaadato. Haddii ilmahaaga loo aqoonsado sida ELL/MLL, waxaa lagu wayddiinayaa in aad ka qaybgasho kullen hanuunin ee ah waqtiga aad baranayso barnaamijyada ELL ee loo heli karo ilmahaaga.

### **WAA MAXAY WAXA LOOLA JEEDO HEERARKA SI FIICAN U AQOONIDDA?**

Iyada oo ku xiran darajada ilmahaaga uu helayo, iyada ama asaga waxaa loo tixgelin karaa ELL/MLL. Sharaxaaadda heerarka si fiican u aqoonidda ayaa lagu bixiyay shaxda miiska hoos:

Heerka	Sharaxaaadda Heerka Si Fiican u Aqoonidda Luuqadda Ingiriiska	
Gelitaanka (Bilow)	Ardayga heerka Gelitaanka wuxuu aad ugu tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadaha luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada(goobo) tacliineed ee kala duwan.	
Ka-sookicid (Heer Hoose Dhexe)	Ardayga heerka Ka-sookicidda wuxuu xoogaa ku tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadaha luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada (goobo) tacliineed ee kala duwan.	U-qalma Adeegyada
Isbeddelaya (Dhexe)	Ardayga heerka Isbeddelaya wuxuu ka muujinaya xogaa madax-bannaani ah horumarinta xirfadaha luuqadda tacliinta, balse wali kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan.	
Balballaarin (Horumarsan)	Ardayga Balballaarinta wuxuu ka muujinaya madax-bannaani badan ee ah horumarinta xirfadaha luuqadda tacliinta wuxuuna ku dhow yahay dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan.	

### **KUMAA MAAMULA OO BIXIYA NATIIJOYINKA IMTIXAANKA?**

NYSITELL waxaa maamula oo bixiya natiijooyinkiisa barayaasha Gobolka New York ee aqoonta u leh.

### **HADDII ILMAHEYGA UU QABO IEP, DIYAAFADINTA IMTIXAANIDDA MALA OGGOL YAHAY XILLIGA NYSITELL?**

Haa, diyaafadinta imtixaanidda ee IEP ardayga waxaa lagu oggol yahay NYSITELL. La hadal macalinka ilmahaaga si aad u hesho macluumaad gaar ah oo ku saabsan diyaafadinta ee uu ilmahaaga sidoo kale xaq u leeyahay.

### **WAA MAXAY ADEEGYADA UU ILMAHEYGA XAQ U LEEYAHAY MARKA ASAGA AMA IYADA LOO AQOONSADO SIDA NELL/MLL?**

Marka ilmahaaga loo aqoonsado sida ELL/MLL, iyada ama asaga waxay xaq u leeyihiin: Adeegyada Waxbarashada Laba Luuqadood (Luuqad Ku-meelgaar ah ama Laba Luuqadood) iyo/ama Ingiriiska Luuqad Cusub Ahaan (ENL). Heerka si fiican u aqoonidda ilmahaaga waxay go'aaminaysaa daqiqadaha adeegyada ELL (waqtiga fasalka) oo ay asaga ama iyada aay helaan toddobaad kasta. Ka eeg shaxda hoos diqiqadaha gaarka ah iyada oo la eegayo heerka si fiican u aqoonidda.

Heerka	Fasalada K-8 Daqiqadaha Waxbarista ENL ee toddobaad kasta	Fasalada 9-12 Daqiqadaha Waxbarista ENL ee toddobaad kasta	Ardayda Barnaamijyada Labada Luuqadood
Gelitaanka (Bilow)	360 daqiqo	540 daqiqo	<ul style="list-style-type: none"> <li>• 1 Kooraska Adabta Luuqadda Guriga</li> <li>• Ugu yaraan 2 maaddo ee ah cilmiiga gaarka ah ee labada luuqadood</li> </ul>
Ka-sookicid (Heer Hoose Dhexe)	360 daqiqo	360 daqiqo	<ul style="list-style-type: none"> <li>• 1 Kooraska Adabta Luuqadda Guriga</li> <li>• Ugu yaraan 2 maaddo ee ah cilmiiga gaarka ah ee labada luuqadood</li> </ul>
Isbeddelaya (Dhexe)	180 daqiqo	180 daqiqo	<ul style="list-style-type: none"> <li>• 1 Kooraska Adabta Luuqadda Guriga</li> <li>• Ugu yaraan 2 maaddo ee ah cilmiiga gaarka ah ee labada luuqadood</li> </ul>
Balballaarin (Horumarsan)	180 daqiqo	180 daqiqo	<ul style="list-style-type: none"> <li>• 1 Kooraska Adabta Luuqadda Guriga</li> <li>• Ugu yaraan 2 maaddo ee ah cilmiiga gaarka ah ee labada luuqadood</li> </ul>

#### **MARKA AAN BARTO NATIIJOYINKA, SIDEEN UGU CAAWIN KARAA GURIGA?**

- Ugu akhri ilmahaaga luuqadiisa ama luuqadeeda aasaasiga/guriga iyo/ama Ingiriis (cilmi-baarlis ayaa muujinaysa in ugu akhrinta ilmahaaga luuqadaada guriga ay ku caawinaysa taageerada xirfadaha Akhris-qoraalka Ingiriiska).
- Ugu sheeg sheekoojin ilmahaaga luuqadaada aasaasiga ah/guriga.
- Booqo maktabadaada degaanka waxaadna amaahataa buugaag maqal oo ah luuqadaada aasaasiga/guriga ama Ingiriis. Xaqiiji in aad ka qaybgasho shirarka waalidka-macalinka ee uu jadwaleeyo dugsigaaga.
- La-jadwaleyso kulan shaqsi ah macalinka ilmahaaga si aad wax uga oggaato siyaabaha gaarka ah ee aad ku caawin kartu in ilmahaaga uu guulaysto.
- Jadwaley waqtii uu ilmahaaga sameeyo shaqo guriga iyo, haddii ay suurtagal tahay, u diyaari goob deggan, oo aan laheyn dhib/buuq, oo ay asaga ama iyada ka shaqeyn karaan.
- Qorshee dibad-baxyo qoyska ay ku tagayaan madxfayo. Hagayaasha masxfafka waxay kugu caawin karaan hagidda soobandhiga ilmahaaga
- Madxfayada iyo maktabadaaha inta badan waxay bixiyaan qiime yar iyo/ama fasalo tayo kordhin bilaash ah kadib dugsiga ama ayaamaha fasaxa toddobaadyada.

Su'aalo iyo khuseymo ku saabsan adeegyada ELL fadlan la xiriir  
[nysparenthotline@nyu.edu](mailto:nysparenthotline@nyu.edu)  
Khatka Tooska ah ee Waalidka ELL: (800) 469-8224

**Su'aalo dheeraad ah?**

Fadlan u soo dir su'aalaha ama faallooyinka Xafiiska

Luuqadaha Adduunka iyo Waxbarashada Labada

Luuqadood [OBEFLS@nysesd.gov](mailto:OBEFLS@nysesd.gov)

Ama wac:718-722-2445

Hadaad rabto macluumaad badan oo ku saabsan NYSITELL  
booqo: <http://www.p12.nysesd.gov/assessment/nysitell/>

